



SHAQO BARASHO IYO ISKAASHATADA

SHAQA BARASHADA DUDSIGA SARE

Dekedda waxay bixisaa layliyo dugsiga sare ah sanadka oo dhan. Saddexdii biloodba mar, waxaan martigelinaa ugu yaraan 25 arday oo xiiseynaya Duulista, Badda, Jooqtaaynta Deegaanka, ama Ganacsiga Dhismooyinka. Waxaan u haynaa barnaamij Guga loogu talagalay dhalinyarada xiiseyneysa jooqtaaynta deegaanka. Xilliga Xagaaga waxaan martigalineynaa 30 + layliyo dhowr meelood oo duulimaadyo kala duwan ah. Xilliga Dayrta iyo Jiilaalka ardayda waxay baran karaan wax walba oo ku saabsan warshadaha Badda ama Ganacsiga Dhismooyinka. Dhamaan layliyo barashadeena dhalinyarada waxay wax ka bartaan waxsoosaarka laxiriira Dekeda waxayna kasbadaan khibrad shaqo oo dhab ah, maareynta mashruuca, lahadalka dadweynaha, iyo xirfadaha horumarinta kooxda.

LAYLIYO DUGSI SARE KADIB

Dekeddu waxay bixisaa fursado tababar oo heer dugsiga sare ah oo gaar ah sanadka oo dhan oo loogu talagalay inay si gaar ah uga shaqeyso iskaashiga dugsiga sare ka dib ee lala yeesho dugsiyada farsamada iyo barnaamijyada shahaadada.

LAYLIYO KULLEEJO IYO QALIN-JABINEED

Dagada waxay bixisaa layliyo kulleej iyo qalinjabinta sanadka oo dhan. Tababaradaani waxay ardayda u oggolaadaan inay ka shaqeeyaan goob la jaanqaadaya waxbarashadooda iyo yoolalka shaqadooda. Dekeddu waxay bixisaa layliyo ku saabsan qaybaha kala duwan ee

Dekedda sida xisaabinta, injineernimada, maareynta dhismaha, maareynta mashruuca, howlaha garoonka, sharciga, ilaha aadanaha, bii'ada, iyo kuwo kaloo badan.

HALYEYADA ISKAASHATADA

Lixdii biloodba, Dekeddu waxay shaqaalaysaa koox yar oo halyeeyo dhowaan kala tagay ama hawlgab noqday. Intii lagu gudajiray wehelnimada mushahar bixinta ee lixda bilood ah, halyeeyada waxaa loo soo bandhigi doonaa bay'ada shaqada rayidka iyo dhaqamada ganacsiga shirkadaha. Saaxiibbada halyeeyga ah waxay lashaqeeyaan lataliye iyo koox-kooxeed si ay uga caawiyaan inay ku hagaan horumarinta himilooyinkooda xirfadeed. Waxay heli doonaan caawimaad si loo aqoonsado xirfadaha la wareejin karo, looga shaqeeyo dib-u-bilaabiddooda, iyo hagaajinta farsamooyinka wareysiga.

Faahfaahin iyo U-qalmitaan

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan Port of Seattle kala duwanaanta laylinta iyo fursadaha wehelnimo, oo ay ku jiraan shuruudaha u qalmitaanka barnaamijka gaarka ah, booqo portseattle.org/careers.

Dhammaan layliyada iyo iskaashiyada ayaa la siiyaa lacag

Dhammaan tababaradayada iyo wada-shaqeyntayada waa la bixiyaa qaar badanna sidoo kale waxay helayaan amaah. Email udir Internships@portseattle.org wixii macluumaad dheeraad ah.